

# Marka Amaanka Hubka iyo **Amaan** U Kaydintu Yahay Yoolkaaga

Shayga ugu amaansan ee aad samayn karto marka ruux khatar korodhsan ugu jira inuu khaarajiyo naftiisu uu gurigaaga ku sugan yahay waa inaad **dhigto hubkaaga meel ka baxsan gurigaaga**.



Marka kowaad, daawo **fiidyawgan gaaban** ee ku saabsan waxa dhalinyartu wajahaan iyo sida aad gacan uga geysan karto **ilaalinta ilmahaaga**.



Marka xiga, wax ka oggow **qorshaha amaanka** adiga oo kaashanaya dhakhtarka cilmi nafsiga iyo khabiirka hubka si aad gurigaaga uga dhigto mid amaan ah.



Hubka ayaa ah **qaabka ugu badan ee nafta lagu khaarajiyo**. U dhaxaysiinta wakhti iyo masaafad ruuxa qaba mushkilada iyo hubka ayaa badbaadisa nololo. Ilaali caruurta dhawr iyo toban jirada ah oo ka baaji khaarajinta nafta adiga oo ku xidhaya qoriga iyo rasaasta khasnado amaan ah ama meel kale geyaya oo guriga ka baxsan ilaa inta mushkiladu meesha ka baxayso. **Daawo fiidyawgan** si aad uga hesho hal tusaale oo ah sida amaanka hubka gacan uga geysan karo ilaalinta nolosha.




Gal **tobobarkeena Wacyigelinta Khaarajinta Nafta ee LiVe Well** si aad wax badan uga ogaato kahortaga khaarajinta nafta iyada oo la adeegsanayo agabka aad u baahan tahay si aad uga hadasho khaararjinta nafta oo gacan uga geysato kuwa ku jira mushkiladaha khaarajinta nafta inay badbaadaan oo ay helaan khayraadka ay u baahan yihiin.

► English



► Español





## Ikhtihaarada Ku Kaydinta Meel Ka Baxsan Meesha oo Ammaan ah Waxaa Kamid ah:


**Xubin Qoys ama Saaxiib Lagu Kalsoon Yahay:** Taleefanka u dir saaxiib ama xubin qoys. Kaliya adiga iyo ruuxa qoyskaaga ah idinma badbaadinayso, laakiin sidoo kale waxay ku siinaysaa taageero dheeraad ah oo aad wakhtiga adag ku maarayso.

**Bilayska:** La hadal bilayska deegaankaaga si aad u fahanto nidaamka aad ugu dhiibi karto hubkaaga oo ay kuugu soo celiyaan.

**Meel Kale Dhig oo ah Istoodh Aad Kiraysato oo Aad Ku Kaydsato:** Xarumaha qaar waxay leeyihiin sanduuqyo wax lagu kaydiyo oo amaan ah iyo ikhtiyaaro ka yaryar hadii aad ku kaydsanayso baastoolado. Hadii aad haysato qoryo waawayn, waxa aad u baahan tahay meel wayn oo aad ku kaydsato.

**Meelaha Shiishka Lagu Barto ama Tukaamada Qoryaha Lagu libiyo:** Xarumaha qaar ayaa leh ikhtiyaaro kaydinta. Marka hore lasii hadal si aad u ogaato. Waxa aad sidoo kale qorigaaga ugu geyn kartaa si laguugu nadiifiyo oo laguugu dayac tiro waxana aad ka dalban kartaa inay kuu hayaan illaa khatartu ay ka yaraanayso.

**Tukaanada Alaabta Lagu Rahmo:** Qaar badan oo tukaanada alaabaadka lagu rahmo ah ayaa kuu hayn kara qoryahaaga iyaga oo ah alaab rahan ah ama kharash yar iyaga oo kaa qaada. Marka hore lasii hadal si aad u xaqiijiyo inuu sidaa kuu samayn karo tukaanka alaabaadka lagu rahmo ee deegaankaaga.



## Ikhtihaaradee ayaan Lagu Talin?

**Qarinta Hubka ayaan Lagu Telin:** Xubnaha qoyska badanaa way yaqaanaan meel kasta oo wax lagu qariyo.

**In Aan Waxba La Samaynin ayaan Lagu Talin:** Hadii ruux gurigaaga ku sugan oo ka fikiro khaarajinta naftiisa ama qorshaynayo ama isku dayayo, fadlan waa in xaaladooda aad u qaadatao dhab; gurigaaga amaan ka dhig adiga oo bedelaha furayaasha sanduuqyadaada oo raacaya talooyinkan iyo talooyinka kale ee amaanka.

Hadii adiga ama ruux kale oo aad garanayso uu la kulmo mushkilad caafimaadka maskaxda ah, fadlan la hadal 988



## Marka In Meel Kale oo Aad Gaysaa ayna Macquul Ahayn, Ikhtiyaarka Ku Xiga ee Lagu Kaydin Karo Guriga Waxaa Kamid ah:

**Ku Kaydi Hubkaaga Sanduuqa Qoriga ama Sanduuq Si Gaar ah Loogu Talo Geley Hubka oo Qufulan:**

Sanduuqa Qoriga ayaa ah ikhtiyaarka kaydinta ugu wanaagsan ee guriga. Ku quful qori aan cabaysnayn qufulka qoryaha ee xadhiga lagu xidho, oo waxa aad ka saartaa keebka oo waxa aad dhigtaa meel amaan ah, oo bedel furayaasha lagu galo. Xubnaha qoyska badanaa waxay yaqaanaan "baaswoodhada qoyska" ee sanduuqa qoryaha, bedel si aad u kordhiso amaanka.

**Si Kumeel Gaadh ah Rasaasta Meel Kale u Dhig:** Si kumeel gaadh ah rasaasta uga qaad gurigaaga ama waxa aad dhigtaa meel qufulan oo ka duwan meesha qoriga.

**Qufullada Keeska iyo Qufullada Xadhig-ku-xidhka:**

Qufullada keebka iyo qufullada xadhig-ku-xidhku ammaan uma aha sida ku qufulista qoriga sanduuq, laakiin waxay dhaantaa in aad waxbaba lagu xidhin. Sidoo kale, waxaa loo isticmaali karaa sanduuqa qoriga si amaan dheeraad ah looga helo.

**Ka Saar Qayb Muhiim ah Qoriga:** Waxa aad ka saartaa ibradda rididda "firing pin", ridaha sare "slide", ama qayb kale oo muhiim ah oo waxa aad u dhiibtaa xubin qoyska ah ama saaxiib si ay kuugu hayso ilaa inta khatartu dhamaanayso.



## Ikhtiyaaro Kale



Badbaadadaada ayaa ah mudnaanteena koowaad. **Agab taageerada go'aanka** oo bilaash ah, oo sir ah ayaa kaa caawin kara inaad gaadho go'aamada ku saabsan si kumeel gaadh ah u yaraynta helitaanka waxyaabaha ay suuragal tahay khatartoodu sida hubka, daawooyinka, shayada leh afka, ama shayada kale ee qoyska.

